



Kasbashada Diploma: Shuruudaha Qalin-jabinta Gobolka

Shuruudaha qalin-jabinta gobolkayaga waxa loogu talagalay inay hubiyaan inay ardaydu leeyihiin aasaas adag oo xirfadaha akhrinta, qorista, xisaabta iyo sayniska ah, iyadoon la eegin jidka ay qaadayaan kadib dugsiga sare. Waxaan ku boorinaynaa qoysaska iyo ardaydu inay si joogto ah ula kulmaan la-taliyeyaashooda si ay u hubiyaan inay ku taagan yihiin dhabbiihi qalin-jabinta.

Inay u-qalmaan qalin-jabinta gobolka Washington, arday dugsiga sare waa inay: Ka gudbaan imtixaannada gobolka u gaarka ah, ay kasbadaan dhammaan dhibcaha aqoonta looga baahn gobolka ama degmadaba, inay ku guuleystaan dhammays-tirka qorshaha dugsiga sare iyo wixii ka sareeya loogu talagalay iyo mashruuca gabagabayntaaba. Shuruudaha qiimayntu waa sidan:

- **Ilaa fasalka 2012:** Ardaydu waa inay ka gudbaan imtixaanka gobolka ee **akhrinta** iyo **qorista**, beddelka gobolku ansixiyo ama qiimayn ardayda kujirta waxbarashada gaarka ah. Ardaydu waxay kasban karaan shuruudda **xisaabta** gobolka iyagoo ka gudba imtixaanka xisaabta dugsiga sare **AMA** kasbada laba dhibcood (credits) oo xisaabta ah kadib fasalka 10^{aad}.
- **Fasalada 2013 iyo 2014:** Ardaydu waa inay gudbaan imtixaanka gobolka ee **akhrinta** iyo **qorista** iyo hal imtixaan oo dhammaadka koorisada **xisaabta** ah, ama imtixaan kaa lagu badalo oo gobolku ansixiyo, ama qiimeynta ardayda kujirta waxbarashada gaarka ah.
- **Fasalada 2015 iyo wixii kadambeeya:** ardaydu waa inay gudbaan imtixaanka gobolka ee **akhrinta** iyo **qorista**, iyo imtixaanada dhammaadka koorsooyinka **aljabra 1**, **joomatari** iyo **bay'oolajiga**, beddelada gobolku ansixiyo ama qiimaynta ardayda kujirta waxbarashada gaarka ah.

Macluumaad dheeraad ah, eeg shaxanka hoose, la hadal la-taliyahaaga ama booqo: www.k12.wa.us/GraduationRequirements.

OGOW: Fasalka qalin-jabinta waxa la go'aamiyaa marka ardaygu ugu horeynta soo galo fasalka sagaalaad

Ilaa fasalka 2012	Fasalada qalin-jabinta 2013 iyo 2014	Fasallada qali-jabinta 2015ka iyo Wixii ka Dambeeya:
<p>AKHRISKA IYO QORISTA Ku gudbaan akhriska iyo qorista imitixaanka WASL/HSPE ee Dugsiga Sare ama qiimeynta ardayda ku jirta waxbarashada gaarka ah. — AMA — Ku gudbaan beddelka gobolku ansixiyey.*</p>	<p>AKHRISKA IYO QORISTA Ku gudbaan akhriska iyo qorista imitixaanka HSPE ama qiimeynta ardayda ku jirta waxbarashada gaarka ah. — AMA — Ku gudbaan beddelka gobolku ansixiyey.*</p>	<p>AKHRISKA IYO QORISTA Ku gudbaan akhriska iyo qorista imitixaanka HSPE ama qiimeynta ardayda ku jirta waxbarashada gaarka ah. — AMA — Ku gudbaan beddelka gobolku ansixiyey.*</p>
<p>XISAABTA Ku gudbaan xisaabta dugsiga sare WASL/HSPE, hal imtixaan koorso dhammaad ama qiimaynta ardayda waxbarashada gaarka ah kujirta. — AMA — Ku gudbaan beddelka gobolku ansixiyey.* — AMA —</p>	<p>XISAABTA Ka-gudub hal imtixaan oo koorisada xisaabta kuwa ugu danbeeya ah (aljabraha 1 ama joomatariga) ama qiimaynta ardayda baahiyaha gaarka ah leh. — AMA — Ku gudbaan beddelka gobolku ansixiyey.*</p>	<p>XISAABTA Ku gudbaan laba dhammaadka-koorsada imitixaannada xisaabta ama qiimeynta ardayda ku jirta waxbarashada gaarka ah. — AMA — Ku gudbaan beddelka gobolku ansixiyey.*</p>
<p>Kasbadaan laba dhibco ee xisaabta (ama xirfadda iyo waxbarashada farsamada u-dhiganta) fasalka 10^{aad} kadib.*</p>	<p>SAYNISKA Loogama sii baahanayo ardayda kujirta labadan fasal ee qalin-jabinaya (sida uu oggolaaday sharciga Juun 7, 2011)</p>	<p>SAYNISKA Ku gudbaan imtixaanka dhammaadka koorisada bay'oolojiga ama qiimaynta ardayda waxbarashada gaarka ah kujirta. — AMA — Ku gudbaan beddelka gobolku ansixiyey.*</p>
<p>SHURUUDAHA KALE Ka soo baxaan dhammaan shuruudaha kale ee qalin Jabinta gobolka iyo degmada dugsiga: Mashruuca Gabagabaynta, Dugsiga Sare iyo Waxii Dhaafsiisan Qorshaha ah iyo shuruudaha dhibcaha degaanka.</p>	<p>SHURUUDAHA KALE Ka soo baxaan dhammaan shuruudaha kale ee qalin Jabinta gobolka iyo degmada dugsiga: Mashruuca Gabagabaynta, Dugsiga Sare iyo Waxii Dhaafsiisan Qorshaha ah iyo shuruudaha dhibcaha degaanka.</p>	<p>SHURUUDAHA KALE Ka soo baxaan dhammaan shuruudaha kale ee qalin Jabinta gobolka iyo degmada dugsiga: Mashruuca Gabagabaynta, Dugsiga Sare iyo Waxii Dhaafsiisan Qorshaha ah iyo shuruudaha dhibcaha degaanka.</p>

*Ardaydu waa inay qaataan imtixaan kasta ee dugsiga sare ee gobolka ugu yaraan mar ka hor isticmaalka beddelka gobolku ansixiyo. Qawaaniin kale ayaa sheega Ururinta Caddaynta.

Waxa la cusboonaysiiyey Julaay 2011

Shuruudaha Qalin-Jabinta Imtixaamidda Gobolka

Imtixaanada gobolka ee dugsiga sare

- Gu'ga 2011, imtixaanka dhammaadka labada koorso ee aljabra 1 iyo joomatari waxay beddeleen xisaabta HSPE.
- Laba bilaabo gu'ga 2012, imtixaanka dhammaadka koorsoada bay'oolajiga waxay beddeli doontaa sayniska HSPE.
- Ardaydu waxay haystaan shan fursadood oo dhaqaalaha gobolku bixiyo xilliga dugsiga sare inay ugu qaataan imtixaanka gobolka tusmo kasta.
- Ardayda ku gudubta Heerka 3 ama dhibcaha 4.
- Hab-socodka rafcaanka dhibcaha: waalidka/masuuliyiintu, kadib markay dib-u-eegaan imtixaanka dugsiga sare ee ardaydooda, waxa dhici karta inay fayl garaysan karaan rafcaanka darajada.
- Si aad wax dheeraad ah uga ogaatid imtixaamtaanka gobolka, fadlan booqo: <http://www.WAtesting.com>.

Shahaadada ku guuleysiga tacliinta iyo Shahaadada Guuleysiga Gaarka ah

- **Shahaadada Hanashada Waxbarashada:** waa mid ah shuruud loogu talagalay qalin-jabinta laga bilaabo 2013.
- **Shahaadada Kasbashada Shakhsiga:** Waxa loogu talagalay kaliya ardayda kujirta waxbarashada gaarka ah. Waa mid ah shuruud loogu talagalay qalin-jabinta laga bilaabo 2013. Ardaydu waxay ku kasban karaan iyadoo gudba imtixaanka HSPW-Basic, WAAS-Portfolio, WAAS-SAPE ama qiimaynta deegaanka lagu go'aamiyey ee akhrinta, qorista, xisaabta iyo sayniska.
- Ardayda ilaa fasalka **2012** ee gudba imtixaanka WASL/HSPE/WAAS ee akhrinta, qorista iyo xisaabta waxay kasban Shahaadada Kasbashada Waxbarashada (CAA) ama Shahaadada Kasbashada Shakhsiga (CIA). **Fasalada 2013 & 2014:** Waa inay gudbaan akhrinta, qorista iyo xisaabta. **Fasalada 2015 iyo wixii ka dambeeya:** Waa inay gudbaan akhrinta, qorista, xisaabta iyo sayniska.
- Ardayda ilaa fasalka **2012** ee kasbada laba dhibcood oo xisaabta ah kadib fasalka 10^{aad}, LAAKIIN aan gudbin imtixaanka xisaabta gobolka ama beddelka gobolku ansixiyo, waxay wali loo ogloyahay inay kasbadaan diblooma laakiin shahaado kasban maayaan.

Beddallada kale ee Gobolku Ansaxisay

- Ardayda leh xirfadaha laakiin aan awoodin inay ku muujiyaan imtixaanada gobolka ayaa laga yaabaa inay adeegsadaan ikhtiyaarada kale ee gobolka oggol yahay.
- Ardaydu waxay heli karaan fursadaha CAA kadib markay qaataan imtixaanka gobolka maado kasta ugu yaraan mar. Ardaydu waa inay qaataan imtixaanka gobolka ugu yaraan laba jeer kahor intayna helin Ururinta Caddaynta.
- Fursadaha Shahaadada Hanashada Waxbarashada ayaa ah:
 - Soo Ururinta Caddeymaha – Ardayda waxay soo ururinayaan muunadaha shaqada fasalka oo isku jirta udimisa iyaga oo u caawinayo macallinku(miintu). Ururiska ardayda ku jirta barnaamijyada Waxbarashada Farsamada ama shaqada ah aya ka mid noqon shaqooyinka ka midka ah barnaamijkooda. Gobolku wuxuu dhibcaha ururiska dareejeeyaa laba jeer sannadkiba. Ardaydu waa inay qaataan imtixaanka gobolka laba jeer jiid kasta kahor intaanay iskudayin ururinta.
 - Waa laga dhaafikaraa lacagta ardayda loo golaado inay qaataan imtixaanada la ansixiyey ee SAT, ACT iyo AP.
 - SAT ama ACT – Ardaydu waxay ugu is tirmaali karaan dhibcahoo xisaabta, akhriska, ama Ingiriisiga iyo dhibcahoo qoraalka imitixaankooda usii diyaargaroobidda kuliyadda (jaamicadda). Dhibcaha ugu yari waa: **Akhriska** – SAT: 350 ACT: 13. **Qorista** – SAT: 380 ACT: 15. **Xisaabta** – SAT: 470 ACT: 19.
 - Meeleynta Horumarsan (AP) – Ardayda ayaa waxa laga yaabaa inay u isticmaalaan dhibcaha ah saddex ama waxa ka sarreeya imtixaannada AP: **Xisaabta** (kaalkulaska iyo istaatishtiska); **Qorista** (Luuqada Ingiriisiga iyo curiska); iyo **Akhriska** (Sugaanta Ingiriisiga iyo curiska, cilmiga dhaqaale-weynaha, cilmiga dhaqaale-yaraha cilmi nafsiga, taariikhada Mareykanka, taariikhada adduunka, dawladda iyo siyaasadda Mareykanka ama isbar-bar-dhigga dawlaha iyo siyaasadah)
 - Isbarbar-dhigga dhibcaha (GPA-ga) – Loogu talagalay ardayda fasalka 12^{aad} kaliya. Dhibcaha xisaabta ee ardayga iyo/ama koorasyada ingiriisiga waxaa lala barbardhigaya dhibcaha ardayda qaadatay koorasyada la midka ah IYO ka gudbay imitixaanka WASL/HSPE/EOC ee dugsiga sare. Si ardaygu uu u helo fursadan, waa in uu haaysto guud ahaan isugeynta Isku cel celiska Dhibcaha Fasalka (GPA) markey ugu yar tahay 3.2 marka loo eegayodarajada dhibcaha ee 4.0.
- Si aad wax dheeraad ah uga ogaatid baddallada kale ee gobolka ansaxiyay, fadlan boqo: <http://www.k12.wa.us/assessment/CAAOptions>.

Qiyaasah loogu talagalay ardayda ku jirta waxbarashada gaarka ah

- Ardayda kujirta waxbarashada gaarka ahi waxay qaadan karaan imtixaanada gobolka ee dugsiga sare iyadoo leh ama aan lahayn jiiif iyo cunto.
- Fursadaha soo socda ayaa waliba la heli karaa:
 - HSPE-AASAASI- Ardaydu waxay qaadanayaan imitixaanka WASL/HSPE ee dugsiga sare - iyada oo ay iyada oo la helo ama aan la helin waafajimo - laakiin kooxyada IEP ayaa is ku habeeya shuruudaha ka gudubtaanka marka laga bilaabo heerka khibrada (Heerka 3) ilala Aasaasiga (Heerka 2).
 - Boortofoliyada Nidaamka Qiimeynta Beddalka Washington (WAAS Portfolio) – Ardayda aanay u suurtagalin imitixaannada warqada iyo qalin-rasaaska ayaa ku muujinaya xirfadahooda iyo aqoontooda ururinta shaqooyinkooda.
 - Imtixaanka Aqoonta Ku-Habboon Horumarka (WAAS-DAW) – Ardayda ku jirta fasallada **11 iyo 12** kaliya ayaa qaadanaya imitixaanka WASL/HSPE - iyada oo la helo ama aan la helin waafajimo - heer darjo fasal ahaan oo sida ugu wanaagsan waafaqaya kartidooda. Ardayda aya ka gudubta imitixaanka DAW iyaga oo kasbanaya Heerka 3 imitixaanka kasta oo ay qaataan.
 - Qiyaasaha Lagu Go'aamiyo Degaanka – Loogu talagalay ardayda dhigata 12^{aad} ee u baahan heerarka hanashada la-beddelay.
 - Heerka Ogaanshaha – Waxaa loogu talagalay ardayda loo ogaaday in wax qabadkoodu yahay heerka "ogaanshaha".
- Si aad wax dheeraad ah uga ogaatid qiimeynta waxbarashada gaarka, fadlan boqo: <http://www.k12.wa.us/assessment/altassess.aspx>.